

Qaloocyada Dheelitirka iyo Darajoyinka


Fahamka Qaloocyada Dheelitirka (Bell Curves)

Qalooca dheelitirka waa sawir muujinaya halka waxqabadka ilmahaagu kaga jiro marka loo eego carruurta ay isku da'da yihiin. Fahamka sida loo akhriyo qalooca dheelitirka wuxuu kaa caawinayaa inaad si fiican u fahanto darajooyinka ilmahaaga. Marka la eego qalooca, bartamaha wuxuu matalaa celceliska (average ama mean). Darajooyinka u janjeedha bidix ama midig waxay muujinayaan in darajada ilmahaagu ka hooseeyso ama ka sarreyso celceliska. Darajooyinka aad uga fog bidix waa kuwa ugu hooseeya, halka kuwa aad uga fog midig ay yihiin kuwa ugu sarreeya.

Qalooca badanaa waxaa loo kala qaybiyaa qaybo. Qeexitaannada (sida celcelis, ka sarreeya celceliska, iwm) iyo xadka boqolleyda way kala duwanaa karaan iyadoo ku xiran tijaabada. Qayb kastaa waxay matalaysaa hal leexasho caadi ah (standard deviation) oo ka baxsan celceliska. Qaybta ugu weyn ee bartamaha ku taalla waxay u dhaxaysaa bidix iyo midig celceliska, waxayna matalaysaa qiyaastii 68% darajooyinka, taas oo caadi ahaan loo tixgeliyo heerka celceliska. Dhammaan qaybaha marka la isku daro waxay noqdaan 100%. Dhinac kasta oo qalooca ah wuxuu matalaa 50% darajooyinka. Marka aad ogaato darajooyinka ilmahaaga, waxaad awoodi doontaa inaad ogaato boqolleyda (percentile) isla markaana aad la barbardhigto carruurta kale.

Fahamka Evaluation Scores

Darajooyinka waxaa loo soo bandhigi karaa siyaabo kala duwan, oo ay ka mid yihiin boqolley (percentiles), T-scores, scaled scores, iyo standard scores. **T-scores** badanaa waxaa loo adeegsadaa cabbirrada dabecadda; waxay leeyihiin leexasho caadi ah oo ah 10 iyo celcelis ah 50. Ilmo leh T-score 40 wuxuu hal leexasho caadi ah ka hooseeyaa celceliska, halka T-score 60 uu hal leexasho caadi ah ka sarreeyo. Sidoo kale, scaled scores waxay leeyihiin celcelis ah 10 iyo leexasho caadi ah oo ah 3, halka standard scores ay leeyihiin celcelis ah 100 iyo leexasho caadi ah oo ah 15. **Scaled scores** badanaa waxay muujinayaan sida uu ardaygu uga shaqeeyay tijaabo-hoosaad (sub-test), halka **standard score** uu muujiyo waxqabad guud. Darajooyinkan waxaa loo adeegsadaa in lagu tixgeliyo kala duwanaanta adkaanta qaybaha kala duwan ee tijaabada. Sawirka hoose wuxuu kaa caawinayaa inaad fahanto sida darajooyinku isu barbar dhigaan. Celcelis, hoose, ama sarreeya —dhammaantood waxay ku xiran yihiin tijaabada gaarka ah.



Wixii macluumaad dheeraad ah booqo <https://www.decodingdyslexiamn.org/binders>

Macluumaadka la bixiyay maaha, oo aan loogu talagalay, ka dhigan talo sharci. Dhammaan macluumaadka, waxa ku jira, iyo agabka, oo ay ku jiraan cid saddexaad, ayaa loogu talagalay ujeedooyin macluumaad guud oo keliya. Waa inaad la xiriirtaa qareenkaaga si aad talo uga hesho arrin kasta oo sharci ah.

